

Talooyin iyo tilmaamo loogu talagalay qaboojiyaha

- ✓ Isticmaal qaboojiyahaha gurigaaga si aad ugu qaboojiso gurigaaga aadna uga faaidaysato.
- ✓ Hubi in qaboojiyaha uu ku taagan yahay meel siman.
- ✓ Si aad ugu raaxaysato, ku qiyaas qaboojiyahaaga 24 ilaa 26°C. Marka aad heerkulka qaboojiyaha ka dhigto lambar hooseeya wuxuu isticmaalayaa koronto badan kharashka ayayna kugu kordhinaysaa.
- ✓ Meelaha hawadu kasoo baxdo ama ay ka gasho waxba ha saarin.
- ✓ Xir daaqadaha markaad isticmaalayso qaboojiyaha.
- ✓ Wax ku dabool qoraxda guriga soo galaysa inta lagu jiro maalinta adoo xiraya daahyada.
- ✓ Wax culus ha dul saarin qaboojiyaha.
- ✓ Si aad u beekhaamiso korontada kharashkana uu kaaga yaraado, maalintii oo dhan isku day inaad cabirka qaboojiyaha ku qiyaasto cimilada siday tahay:
 - Goor hore sii qabooji gurigaaga maalmaha ay cimiladu kulushahay,
 - Marka uu kuleylka ugu badan uu jiro maalintii oo dhan, ka dhig heerkulka qaboojiyaha meel sare.


Su'aal ma qabtaa?

- @ HighRiseCooling@homes.vic.gov.au
- 1800 519 721
- www.homes.vic.gov.au/cooling-our-high-rise-towers

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.
© Gobolka Victoria, Homes Victoria, Maarso 2025.
Daabacaad ay maamusho Finsbury Green, Melbourne Victoria, 3000 (HV004225)

Isticmaalka DeLonghi (PAC EL112 CST)

Sida loo hago oo kooban



Haddii aad rabto inaad qaboojiyahaaga meel kale geyso

Haddii uu gurigu leeyahay **in ka badan hal dalool oo ay hawadu ka baxdo**, waxaad qaboojiyahaaga geyn kartaa marba meeshaa doonto ee labada dalool leh. Si aad taas u samayso:






U leexi tuubada hawo-mareenka dhanka saacada ay aado maahee dhanka kale to aad tuubada uga saarto daloolka.




U qaado qaboojihaas meeshaad rabto inaad geysato.



U leexi tuubada hawo-mareenka dhanka saacadda ay aado markaad geliso duleelka si aad ugu habsato.



Haddii ay tuubadaada hawo-mareenka ay kasoo baxdo qaboojiyaha, dib ugu dheji adigoo u leexinaya tuubada saacada dhinaceeda ee godka qaboojiyaha.



Arrimaha dayactirka:

Kala xidhiidh **Xarunta Wicitaanka Guryaha 13 11 72** ama xafiiska **guryaha ee xaafadaada** wixii cilad ama wax ka haleysan qaboojiyahaaga ah.


Dayactirka

Nadiifinta filtarka

In si joogto ah loo nadiifiyo filter ka waxay ka dhigan tahay in uu qaboojiyuhu si fiican u shaqayn doono oo uu cimrigiisu dheeraan doono.

Isticmaal faakiyuum ama biyo qandac ah (wax ka hooseeya 40°C) si aad u nadiifiso.

Si fiican hau qalasho inta aadan isku rakibin kahor.




Ciladaha badanaa la arko

HADDII... WAA LA SOO BANDHIGAY,
HL
⚠
"High Level" (Qeybta gudaha ayaa buuxda)
..MAXAAN SAMEEYAA?

Marka biyaha laga saarayo mashiinka

- Baaldi ama baaquli hoos dhig mashiinka.
- Boolasha fur oo furka ka saar.
- Ka daadi biyaha.
- Beddel furka.
- Nadiifi filtarka.



HADDII... WAA LA SOO BANDHIGAY,
EL
⚠
"Cilad ku timaada dhanka tilmaam bixinta (communication failure)" (Cilad gudaha ah oo la xiriirta tilmaam bixinta)
..MAXAAN SAMEEYAA?

Isgaarsiin la'aan

1. Ka saar fiilada mashiinka godka gidaarka ilaa 15 ilbiriqsi.
2. Dib u geli fiilada mashiinka godka gidaarka oo shid.
3. Haddii dhibka aan la xalin, la xiriir kuwa wax sameeya.